# Buugyaraha Uqalmitaanka MSHSL

**<u>Ardayda:</u>** Kaqeybgalkaaga hawlaha dugsiga sare waxa uu ku xiran yahay uqalmitaankaaga. ILAALI uqalmitaankaas adiga oo dib u eegis kula sameynaya waalidkaaga(waalidiintaada)/masuulka(masuulyiinta) soo koobistan kusaabsan shuruucda Horyaalka Dugsiga Sare ee Gobolka Minnesota ee xukuma ka qaybgalkaaga. Xeerarka oo dhammeystiran waxaa laga helaa Buug-gacmeedka Rasmiga ah ee MSHSL oo laga heli karo dugsi sare kasta oo xubin ka ah oo sidoo kalena lasoo dhigo Webseedka MSHSL: www.mshsl.org/about/mshsl-handbook. Fadlan tixraac u hayso buug-yarahan, oo haddii ay jirto wax su'aal ah oo kusaabsan tarjumaada xeerka, **LA XARIIR MAAMULAHA DUGSIGAAGA AMA AGAASIMAHA CIYAARTOYGA/HAWLAHA.**

Waxaan fahamsanahay inay tahay inaan saxiixo bayaanka uqalmitaanka ee hadda jira kahor kaqeybqaadashada sanad dugsiyeed kasta.
Waxaan fahamsanahay in marka aan saxiixo bayaanka uqalmitaanka in dhammaan sharciyada uqalmitaanka ay khuseeyaan:
- 12-ka bilood ee sanadka;
- Haddii aan hadda kaqeybqaadanayo iyo haddii kaleba;
- Si joogta ah laga bilaabo saxiixa u horreeya ee bayaanka ilaa dhammaadka uqalmitaankeyga ee dugsiga sare.

**<u>Waalidiinta/Kuwa Masuulka ka ah Ardayda:</u>** DIB U EEGIS kula samee sharciyada soo socdo wiilkaaga ama gabadhaada. Doorka aad ku leedahay adkaynta qiimaha raacaya xeerarkan lama soo koobi karo.

Liiska Hubinta Uqalmitaanka Guud ee Ardayga (oo ay tahay inay buuxiyaan dhammaan ardayda) (Haddii aadan hubin karin dhammaan 8-da shey, u tag agaasimaha ama maamulaha ciyaartoyga/hawlaha)

____ 1. Sameynta horey u socodka tacliinta ee xagga qalinjabinta.
____ 2. Ma jirsan doono 20 sano kahor bilaabashada xilli-ciyaareedka aan kaqeybgalaayo.
____ 3. Maka saaqidin dugsiga ama fasal kuma celin ka bilaabmaya gelitaanka hore ee fasalka 9-aad.
____ 4. Ma isticmaalin mana isticmaali doono ama haysan doono tubaako ama cabitaanada khamriga ah, ma sameyn doono adeegsiga, isticmaalka, haysashada, soo iibsiga, iska iibinta ama bixinta daroogadi kale ee kasta ee la xakameeyo, ay kujiraan dawooyinka awoodda kor uqaada, qalabka daroogada ama badeecooyinka ay kujiraan ama loo isticmaalo in lagu geeyo badeecada tubaakada, waxyaabaha laga sameeyo tubaakada iyo sunta kale.
____ 5. Ma ku xadgudbin ama ku xadgudbi doono xeer-hoosaadka MSHSL ee isirka/diinta/ dhibaataynta galmada/rabshadaha/iyo waxyeellaynta.
____ 6. Waxaan oggolaanayaa inaan si buuxda ula shaqeeyo baaritaan kasta si daacad ah oo dhab ah.
____ 7. Iyada oo aanan loo eegeynin da'deyda waxaan oggolaanayaa inaan raaco dhammaan xeerar hoosaadyada MSHSL si aan ugu qalmo inaan dugsigeyga ku matalo hawlaha uu soo qabanqaabiyo Horyaalka.
____ 8. Labadaba ardayga iyo waalidkuba waxa ay dib u eegis ku sameeyeen macluumaadka maareynta miyir-beelka ee kujira Buug-yaraha Uqalmitaanka oona laga helo webseedka soo socdo: www.cdc.gov/headsup

**<u>Liiska Hubinta Uqalmitaanka ciyaaraha fudud</u>** *(oo ay tahay inay buuxiyaan dhammaan ciyaartoyda) (Haddii aadan hubin karin dhammaan 5-ta shey, u tag agaasimaha ama maamulaha ciyaartoyga/hawlaha)*

____ 1. Baaritaanka jireed ee saddexdi (3) sano ee lasoo dhaafay gudahooda oo uu dugsigu fayl kuhayo.
____ 2. Dugsiyo u kala badalan.
____ 3. Uusan kaqayb qaadan doonin in ka badan lix (6) xilli-ciyaareed ee ciyaar kasta ee fasallada 7-12.
____ 4. Aqbalin lacag caddaan ah oo dhan cadad kasta ama badeecad qiimaheedu ka badan yahay $100 oo lagu qaadanayo ka qayb qaadashada ciyaaraha.
____ 5. U tartamin una tartami doonin dhacdooyinka aanan dugsiga ahayn ee ciyaarahayga inta lagu guda jiro xilli ciyaareedkeyga dugsiga sare.

**OGGOLAANSHO XOG OGAAL AH:** Dabeecad ahaanteeda, kaqeybgalka ciyaaraha fudud ee dugsiyada u dhexeeya waxaa kamid ah halista soo gaaritaanka dhaawac iyo isugudbinta cudurada faafa sida HIV, Cagaarshowga, cadhada iyo kuwa kale oo badan. Inkasta oo aysan badneyn dhaawacyada halista ah, halista isku gudbinta cudurka HIV kudhawaad waa mid aananba ka jirin barnaamijyada ciyaaraha fudud ee dugsiga ee la kormeero, waa mid aanan suuragal ahayn in meesha laga wada saaro dhammaan khatarta. Kaqeybgalayaasha waxa ay masuuliyad ka saaran tahay inay gacan kageystaan yareynta khatartaas. Kaqeybgalayaashu waa inay adeecaan dhammaan shuruucda badbaadada, dhammaan dhibaatooyinka jireed ama nadaafadeed usoo sheegaan tababarayaashooda, raacaan barnaamijka tababarka jirka ee ku habboon, oo ayna maalin kasta kormeeraan qalabkooda.

# DIB U EEGIDDA XEER HOOSAADKA GUUD

**Dhammaan go'aannada uqalmitaanka MSHSL waxaa lagu saleeyaa xeer hoosaadyada laga helo buug-gacmeedka rasmiga ah ee hadda jira ama webseedka MSHSL barta: www.mshsl.org/about/mshsl-handbook**

* Waxa ay tilmaameysaa sharciyada lagu dabaqi karo hoggaamiyayaasha mashxaradda dabaaldegga

1. ***TACLIINTA** — (Sharuudda Buundo-xisaabinta) Si uu ugu qalmo, ardaygu waa inuu sameeyaa horumar lagu qanco oo ku wajahan shuruudaha dugsiga ee qalin jabinta.
2. ***DA'DA** — Ardaygi jirsada 20 sano inta lagu jiro simistarka 11-aad ama 12-aad laga soo bilaabo tan iyo marki uu soo galay fasalka 7-aad waa in loo oggolaadaa nuu ka qaybqaato marka uu dhamaysto simistarka 12-aad. Ciyaartoyda lasoo korsaday way u qalmaan iney ka qaybgalaan ilaa iyo sannad guuradooda 22-aad, taasoo ku xiran iney buuxiyaan dhammaan shuruudaha kale ee uqalmitaanka.
3. **HEERKA HIWAAYADA CIYAARTOYGA** — Ardaygu waa inuu ahaadaa qof hiwaayad ay u tahay ciyaartaas. Ardaygu ma heli karo lacag caddaan ah ama badeecadda loogu talagalay kaqeybgalka ciyaarta. Ardaygu ma uluminayo heerka hiwaayadda ciyaartoyga sababo la xariiro dib u bixinta kharashka dhexdhexaadinta ciyaarta, tilmaamidda, baridda ama tababarka isboortiga. *(Tixraaca Xeer-hoosaadka 201 ee qodobbada hiwaayadda dheeraadka ah)*
4. **ABAALMARINADA** — Abaalmarinada la aaqbali karo ee ardayga ee lagu aqoonsanayo kaqeybgalka waxqabadyada dugsiga sare waxaa kamid ah billadaha, xargo-sharafeedka, xarfaha, koobabka, tabbeelooyinka, iyo waxyaabo kale oo qiimo yar ama aan lahayn ($100.00 ama ka yar). Xadgudubyada waxa ay ardayga kadhigi doonaan mid aanan uqalmin hawshaas.
5. **DIIWAANGELINTA, SOO XAADIRITAANKA, IYO QAADASHADA MAADOOYINKA LOO BAAHANYAHAY** — Ardaydu waa inuu si buuxda u diwaangashan yahay (sida ay qeexday Waaxda Waxbarashada ee Minnesota) oo ay soo xaadiraan dugsiga ka hor inta aanay u qalmin inay ku matalaan dugsigaas howlaha ay maalgeliso MSHSL. Ardaydu waa in si sax ah loo diiwaangeliyaa, ee sida joogtada ah u dhiganaya dugsiga iyo fasalka. Ardaydu waa inay hayaan wadada saxda ah ee ay ku buuxinayaan shuruudaha qalinjabinta ee dugsiga lix sano gudahood (12 simistar oo isku xiga) laga bilaabo maalinta u horreysa ee la tago fasalka 7-aad.
   Ujeedooyinka uqalmitaanka baddelaada kaqaybgalka barnaamijka dugsiga waxaa loo qadariyaa ka diiwaangashanaanta buuxda ee dugsigaas.
6. **ISWAYDAARSIGA ARDAYDA QALAAD** — Iswaydaarsiga Ardayda Qalaad ee la oggol yahay waxay ku xaddidan yihiin 1 sanad dugsiyeedka kalandarka ee uqalmitaanka dugsiga sare laga bilaabo taariikhda 1-aad ee isdiiwaangelinta iyo imaanshaha.
   ARDAYDA CAALAMIGA AH – Ardayda aan ka qayb qaadaneynin barnaamijka isweydaarsiga ciyaartoyda qalaad ee ay ogolaatay CSIET waxa ay uqalmayaan oo kaliya kooxda B ama heerka JV muddo hal sano oo kalandarka ah.
7. ***UQALMITAANKA GUUD** — Si loogu qalmo xilli-ciyaareedka caadiga ah iyo tartanka is-reereebka MSHSL, ardaygu waa inuu si buuxda u diiwaangashanaadaa sida lagu qeexay Waaxda Waxbarashada ee Minnesota oona yahay/tahay xubin daacad ah oo ka tirsan dugsigiisa ama dugsigeeda sare oo kaga jira meel wanaagsan. Ardayga uu saaran yahay ganaaxa ka reebitaanka, ceyrinta ama ka joojinta, oo dabeecadiisa ama habdhaqankiisa ay jabineyso Xeerka Masuuliyadaha Ardayga oo aan meel wanaagsan ku jirin, waa in uusan uqalmin muddo waqti ah sida uu go'aamiyo maamulaha.

   **Xeerka Masuuliyadaha Ardayga**

   *Ka ahaan arday kaqeybqaadanaya waxqabadyada dugsiyada u dhexeeya ee dugsigeyga, waxaan fahamsanahay oo aqbalayaa masuuliyadaha soo socdo:*

   *A. Waxaan ixtiraami doonaa xuquuqda iyo waxa ay aaminsan yihiin dadka kale waxaana ula dhaqmi doonaa kuwa kale si qadarin iyo tixgelin leh.*

   *B. Waxaan si buuxda masuul ooga noqon doonaa ficiladeyda iyo cawaaqib xumada kadhalata ficiladeyda*

   *C. Waxaan ixtiraami doonaa hantida dadka kale.*

   *D. Waxaan ixtiraami doonaa oo adeeci doonaa xeerarka dugsigeyga iyo shuruucda bulshadeyda, gobolkeyga iyo wadankeyga.*

E. *Waxaan ixtiraam u muujin doonaa dadka masuulka ka ah dhaqangelinta xeerarka dugsigeyga iyo shuruucda bulshadeyda, gobolkeyga iyo wadankeyga.*

Ardayga laga reebo tartanka waa inuusan uqalmin ciyaarta soo socota ee sida caadiga ah loo qorsheeyey ama uu buuxiyaa tartanka heerkaas iyo dhammaan ciyaaraha kale ama kulamada kumeelgaarka ah ee heer kasta oo kamid ah tartanka, marka ugu horeysa ee laga reebo. Dhammaan ka reebitaanada xiga waxa ay keeni doonaan in aanan loo qalmin afarta (4) ciyaar ama kulan ee soo socota ee sida caadiga ah loo qorsheeyey.

8. ***XILLI-CIYAAREEDYADA LAGA QEYBGALAYO** — Majiro arday kaqeybgali kara wax kabadan lix (6) xilli-ciyaareed ciyaarti kastaba inta uu ka diiwaangashan yahay fasallada 7-12, simistarada 1-12 oo dhan.
9. ***SIMISTARADA DIIWAANGASHAN**— Arday kasta waxa uu u qalmaa kaqeybgalka waxqabadyada ciyaareed ee uu Horyaalku taabagaliyo muddo afar sanad dugsiyeed oo isku xigo laga bilaabo soo galitaankoodii koowaad ilaa fasalka sagaalaad.
   - Ardayda dhigata fasalada 7 iyo 8 ayaa kaqeybgali kara ciyaaraha fudud ee uu Horyaalku taabagaliyo sida uu qabo xeerka Bylaw 105.1.
   - Kaqeybgalku waxa uu bilaabmayaa marka ardayga dhigta fasalka 7aad ama 8aad uu u tababarto ama ka tartamo ciyaaraha fudud ee uu Horyaalku taabagaliyo.
   - Ardayda waxaa loo oggol yahay hal sanad dugsiyeed oo kaqeybgalka fasalka 7aad ah iyo hal sanad dugsiyeed oo kaqeybgalka fasalka 8aad ah ee ciyaaraha fudud ee uu Horyaalku taabagaliyo.
10. **KA QAYBGALKA DUGSIGA SARE/DHEXE** — Ka qaybqaadashada barnaamijyada u dhexeeya dugsiyada ee dugsiyada sare waxay ku kooban tahay ardayda fasallada 7-12 oo dhan.  Ardayda dhigata fasallada 7, 8, 9 waxa ay kaqeybqaadan karaan haddii ay ka diiwaangashan yihiin dugsiga caadiga ah ee qaybta waxbarashada iyo haddii dhammaan shuruudaha kale ee uqalmitaanka Horyaalka la buuxiyo. Ardayda dugsiga hoose ee fasallada 1-6 uma qalmaan ka qaybgalka hawlaha MSHSL ay soo qabanqaabiso; kooxda B, kooxda hoose ee dugsiga mataleysa ama heerka kooxda dugsiga mataleysa.
11. ***QALINJABIYE** — Ardayda ka qalinjabisay dugsiga sare, ama dhammeystiray teeramka ama fasalka u dambeeya ee dugsiga sare, ama qaatay GED ama shahaadada dhibloomada ma uqalmaan inay kaqeybqaataan wax hawl ah oo Horyaalka ah Ardaygii qalinjabiya isagoo xubin ka ah koox oo xilli-ciyaareedkuna uu socdo waa uu dhammeystiran karaa xilli-ciyaareedka haddii saddex toddobaad ama kayar ee xilli-ciyaareedka caadiga ah, oo aysan kujirin ciyaarta is-reereebka Horyaalka, ay ka harsan yihiin.
12. ***KIIMIKOOYINKA BADDALA XAALADDA**

**A. Tixraaca Xeer Hoosaadka 205**

Laba iyo toban bilood ee sanadka, ardaygu waa inuusan waqti kasta, iyada oo aan loo eegeynin tirada:

- adeegsigan, isticmaalin, oo uusan haysan cabitaan ay kujirto khamro;
- adeegsigan, isticmaalin, oo uusan haysan tubaako;
- adeegsigan, isticmaalin, oo uusan haysan, oo uusan sameyn soo iibsiga, iska iibinta ama bixinta daroogadi kale ee kasta ee la xakameeyo ama dawooyinka awoodda kor uqaada,
- adeegsigan, isticmaalin, oo uusan haysan, oo uusan sameyn soo iibsiga, iska iibinta ama bixinta badeecooyin ka kooban,  ama badeecooyin loo isticmaalo in lagu geeyo badeecooyinka tubaakada iyo sunta kale.

"Badeecadaha tubaakada" micnaheedu waxa ay tahay: badeecad kasta ay kujirto, laga sameeyey ama laga keenay tubaako oo loogu talagalay in dadku ay isticmaalaan, ha ahaato mid la ruugo, mid la cabo, mid la dhuuqo, mid la qaso, mid sanka laga qaato, mid la jiido, mid la shiiriyo, ama loo laqo qaab kasta oo kale, qeyb, wax kamid ah ama gacan kageysanya badeecada tubaakada, (5) adeegsiga, isticmaalka, haysashada, soo iibsiga, iska iibinta ama bixinta wax daroogo ah ama badeeco oo ujeedadu tahay in lagu sarkhaamo, lagu farxo, ama looga tanbadiyo habdhiska dhexe ee neerfayaasha, marka laga reebo in lagu qaato hagista iyo kormeerka dhakhtarka caafimaadka.  Walxaha ama badeecooyinka noocaas ah waa in ay ku jiraan, laakiin aanay ku koobnaan, daroogooyinka macmalka, shidaalka, koollada, aaladaha naq buufinta, cusbada qubeyska, iyo sheeyaal kasta oo uu ka hadlay sharciga Minnesota ama Federaalka.

1. Xeer hoosaadku waxa uu si joogta ah u khuseeyaa laga bilaabo saxiixa koowaad ee Buug-yaraha Uqalmitaanka ardayga.
2. Ma ahan xadgudub in ardaygu haysto walxo la xakameeyey oo isticmaalka si gaar ah dhaktarkiisu/dhakhtarkeedu ugu qoray.

**B. Ciqaabta**

1. **Xadgudubka Koowaad**: Kadib marka la xaqiijiyo xadgudubka koowaad, ardaygu waxa uu lumin doonaa uqalmitaanka labo (2) tartan oo iskuxiga ee xiga oo dugsiyada u dhexeeya ama labo (2) toddobaad oo kamid ah xilli-ciyaareedka ee uu ardaygu kaqeybgalayo, hadba kan weyn.  Ma jirto wax kadhaafitaan ah oo loo oggol yahay ardayga ka qaybqaata barnaamijka daawaynta.

2. **Xadgudubka Labaad:** Kadib marka la xaqiijiyo xadgudubka labaad, ardaygu waxa uu lumin doonaa uqalmitaanka lix (6) tartan oo iskuxiga ee xiga oo dugsiyada u dhexeeya ee uu ardaygu kaqeybgalayo ama saddex (3) toddobaad, hadba kan weyn. Ma jirto wax kadhaafitaan ah oo loo oggol yahay ardayga ka qaybqaata barnaamijka daawaynta.
3. Xadgudubyada Saddexaad iyo Kuwa Xiga: Kadib marka la xaqiijiyo xadgudubyada saddexaad ama ka dambeeya, ardaygu waxa uu lumin doonaa uqalmitaanka labo iyo toban (12) tartan oo iskuxiga ee xiga oo dugsiyada u dhexeeya ee uu ardaygu kaqeybgalayo ama afar (4) toddobaad, hadba kan weyn. Haddii xadgudubyada saddexaad ama kuwa ka dambeeya ka dib, ardayga la qiimeeyay inuu kiimikaad ku tiirsan yahay oo ardaygu si ikhtiyaari ah uga qaybqaato barnaamijka kutiirsanaanta kiimikada ama barnaamijka daawaynta, markaas ardayga waxaa loo oggolaan karaa in dib loogu soo celiyo howlaha MSHSL ugu yaraan lix (6) toddobaad kaddib. Xaqiijinta oggolaanshaha noocaan ah waa inuu bixiyaa agaasime ama lataliyaha xarunta daaweynta kutiirsanaanta kiimikada.
4. **Ganaaxyadu** waa kuwo is daba joog ah oo isku xig-xiga.
5. **Diidmada Kajoojinta Uqalmitaanka:** Aradayga waxaa laga saari doona dhammaan ciyaaraha fudud ee u dhaxeeya dugsiyada ilaa sagaal (9) isbuuc oo dheeraad ah oo ka baxsan waqtigii asalka ahaa ee hore ee uqalmid la'aanta ardayga marka ardaygu dafiro inuu ku xadgudbay sharciga, loo fasaxo inuu ka qayab galo haddana kaddib lagu helo inuu gaystay xadgudubka.

**C. Ganaaxyada Qaybta II ee Hawlaha**

**Qeexitaanka - Qaybta II ee Hawlaha:** Hawlaha uu soo qabanqaabiyo Horyaalka oo dugsiga xubinta ka ah uusan qorsheyneynin tartamada ciyaaraha dugsiyada u dhexeeya, marka laga reebo is-reereebyada uu Horyaalku soo qabanqaabiyo.

Hawlaha Farshaxanka Fanka

1. Hawlaha hadalka oo ay ku jiraan One Act Play marka dugsigu aanu jadwal u samayn tartanka dugsiyada dhexdooda oo uu ka qaybqaato kaliya taxanaha tartanka ee uu Horyaalku soo qabanqaabiyo.
2. Hawlaha Muusiga.
3. Hawlaha Farshaxanka Muuqda.

   Xubin kasta oo katirsan dugsiga waa inay soo saartaa ganaaxyada ee lagu dabaqi doono kaqeybgalayaasha hawlahaas. Nuqul ka mid ah
   siyaasadda dugsiga xubinta ka ah waa in la dhigaa xafiiska maamulaha.

**13.*DHIBAADAYNTA GALMADA/ISIRKA/DIINTA/RABSHADAHA IYO WAXYEELLEYNTA**

**A. Tixraaca Xeer Hoosaadka 209.00**

Ardaygu waa inuusan ku lug yeelan dhibaateynta galmada, isirka, diinta, rabshada ama waxyeelleynta inta lagu jiro sanad dugsiyeedka ama qeyb kasta oo kamid ah hawlaha xilli-ciyaareedka ee dhaca kahor bilaabashada sanad dugsiyeedka ama kadib xiritaanka sanad dugsiyeedka.

**B. Habraacyada Soo Sheegitaanka**

1. Qofkasta oo aaminsan inuu dhibane u yahay dhibaateynta galmo, jinsiyad, diimeed, rabsho ama waxyeeleyn ama qofkasta oo ka warhaya ama aaminsan in fal lageystay uu noqon karo waxyeelleyn, waa inuu ficilada la sheegay sida ugu dhakhsaha badan ugu sheegaa masuulka ku habboon ee degmada dugsiga ee loo xilsaaray siyaasadan.
2. Maamulaha dhismaha waa qofka masuulka ka ah in loo soo sheego warbixinada kusaabsan galmada, jinsiyada, dhibaateynta diimeed, rabshada ama waxyeelleynta kadhacday heerka dhismaha. Qofkasta waxa uu waxyeeleynta si toos ah ugu soo sheegi karaa masuulka xuquuqul insaanka ee degmada dugsiga ama maamulaha guud.
3. Macalimiinta, maamulayaasha, masuuliyiinta, isxilqaamayaasha, shaqaalaha dugsiga degmada waa inay si gaar ah ooga digtoonaadaan xaaladaha suurtagalka ah, daruufaha ama dhacdooyinka laga yaabo inay kujiraan dhibaateynta galmada, jinsiyada, dhibaateynta diimeed, rabshada ama waxyeelleynta. Qofkasta oo noocaan ah oo hela warbixin ah, soo indha-indheeya, ama aqoon kale u lahaa ama aaminsanaanta habdhaqanka, ama taasi ay keeni karto dhibaateynta galmo, jinsiyad, diimeed, rabsho ama waxyeeleynta, waa inuu si degdeg ah kusoo wargeliyaa maamulaha dhismaha.
4. Gudbinta cabasho daacad ah ama warbixinta dhibaateynta galmo, jinsiyad, diimeed, rabsho ama waxyeelleynta saameyn kuma yeelan doonto shaqaaleysiinta mustaqbalka, darajooyinka, ama shaqada qofka soo gudbiyey cabashada ama warbixinta.

**C. Aargoosiga**

Degmada dugsiga waxa ay edbin doontaa ama tallaabo ku habboon oo kadhan ah ka qaadi doontaa arday kasta, macalin, maamule, is-xilqaame, tababare, masuul qandaraasle ah, shaqaalaha degmada dugsiga oo ka aarsada cid kasta oo si daacadnima ah usoo sheegta dhibaateynta galmo, jinsiyad, diimeed, rabsho ama waxyeelleynta la sheegay ama mid kadhan ah qof kasta oo ka marqaati fura, ka caawiya ama kaqeybqaata baaritaan, ama mid kadhan ah qof kasta oo ka

marqaati fura, ka caawiya ama kaqeybqaata dacwadaha ama dhageysiga la xariira dhibaateynta galmo, jinsiyad, diimeed, rabsho ama waxyeelleynta noocaan ah. Aargoosiga waxaa kujira laakiin aanay ku koobneyn, nooc kasta oo caga jugleyn ah, aarsasho ama dhibaateyn.

**D. Ganaaxyada Qaybta I ee Hawlaha**

1. Xadgudubka Koowaad: ardaygu waxa uu lumin doonaa uqalmitaanka labo (2) tartan oo iskuxiga ee xiga oo dugsiyada u dhexeeya ama labo (2) toddobaad, 14 maalmood oo kalandarka ah, oo kamid ah xilli-ciyaareedka ee uu ardaygu kaqeybgalayo, hadba kan weyn.
   *Talooyinka:*
   a) *Waxaa lagu talinayaa in dugsigu horumariyo barnaamij waxbarasho oo maxalli ah kaas oo ardaygu ku heli karo macluumaadka ku saabsan galmada, isirka, dhibaataynta diinta, rabshada ama waxyeelleynta.*
   b) *2) Waxaa lagu talinayaa, marka ay habboon tahay, in dugsigu u gudbiyo ardayga hay'ad bulsho ama qof xirfadle ah oo ka baxsan dugsiga si uu u waaniyo.*
2. Xadgudubka Labaad: ardaygu waxa uu lumin doonaa uqalmitaanka lix (6) tartan oo iskuxiga ee xiga oo dugsiyada u dhexeeya ama saddex (3) toddobaad, 21 maalmood oo kalandarka ah, hadba kan weyn, ee uu ardaygu kaqeybgalayo. Talo soo jeedin: Waxaa lagu talinayaa kahor inta aanan dib loogu oggolaanin hawlaha kadib ka joojinta xadgudubka labaad, ardaygu waa inuu keenaa caddeyn qoraal ah oo ah in ardaygu latalin kahelay hay'ad bulsho ama shakhsi xirfadle ah sida lataliyaha dugsiga, dhakhtarka caafimaadka, dhakhtarka maskaxda, ama khabiirka cilmi-nafsiga.
3. Xadgudubyada Saddexaad ama Kuwa Xiga: ardaygu waxa uu lumin doonaa uqalmitaanka labo iyo toban (12) tartan oo iskuxiga ee xiga oo dugsiyada u dhexeeya ama afar (4) toddobaad, 28 maalmood oo kalandarka ah, hadba kan weyn, ee uu ardaygu kaqeybgalayo.
4. Ganaaxyadu waa kuwo is daba joog ah oo isku xig-xiga.

**E. Ganaaxyada Qaybta II ee Hawlaha**

Xubin kasta oo katirsan dugsiga waa inay soo saartaa ganaaxyada lagu dabaqi doono kaqeybgalayaasha hawlahaas. Koobiga hadda ee siyaasadda xubinta katirsan dugsiga waa in lagu hayaa faylka dugsiga xubinta ka ah.

14. **QAADASHADA CIQAABTA MSHSL** — Ardaygu waa inuu noqdaa arday ku sugan dhaqan wanaagsan, oo awood u leh in lagu meeleeyo ciyaarta, kulanka ama tartanka marka laga reebo ciqaabta lagu soo rogay. (Ardayda aanan ku sugnayn dhaqan wanaagsan oo ay ugu wacantahay ka joojinta imaansha iskuulka, cayrin, dhaawac, xanuun, dalxiiska qoyska, iwm. ma awoodaan in lagu meeleeyo ciyaar, kulan ama tartan sidaas darteed ma awoodaan inay ku tiriyaan tartammadaas ciqaab).
15. **GANAAXYADA ISDABA JOOGA AH OO ISKUXIGA** —Ganaaxyadu waa inay noqdaan kuwa isdaba joog ah oo isku xiga laga bilaabo kaqeybgalka koowaad ee ardayga ee hawsha Horyaalka iyo sii wadida shaqada dugsiga sare ee ardayga.
16. **KOOXAHA KULEEJKA/JAAMACADDA** — Shakhsiyaadka kaqeybgalay kooxaha kuleejka ama jaamacadda waxa ay uma qalmaan inay kaqeybgalaan wax hawl ah oo kamid ah Horyaalka.
17. **HABRAACA DHAGEYSIGA CADDAALADDA AH** — Dastuurka Horyaalka waxa uu ardayga ama waalidka siinayaa Habraaca Dhageysiga Cadddaaladda ah ee u tartamaya go'aanka uqalmitaan la'aanta dugsiga ee ardayga. **Ardaygu waxa uu haystaa 10 maalmood oo maalmaha kalandarka ah oo uu rafcaan kaga qaato go'aanka dugsiga.** Hannaanka racfaan qaadashada waxaa kamid ah racfaanka ka horreeya guddiga dhageysiga ee dugsiga iyo xuquuqda, haddii loo baahdo, in racfaanka go'aankaas loo gudbiyo Agaasimayaasha Guddiga ee Horyaalka. Baaraha dhageysiga oo madax bannaan ayaa dhageysan doona racfaanka waxa uuna soo saari doonaa xaqiiqda natiijooyinka oo qoraal ah, gabagabada iyo talo usoo jeedinta Agaasimayaasha Guddiga kadib dhageysiga. Go'aanka Guddiga waxa uu noqon doonaa mid kama dambeys ah. Liiska dhamaystiran ee Habraaca Dhageysiga Caddaaladda ah waxaa laga heli karaa agaasimaha ciyaartoyda ama maamulaha dugsiga sare ama bartan www.mshsl.org/about/mshsl-handbook.

# XEERARKA CIYAARAHA FUDUD

1. ***BAARITAANKA JIREED IYO OGGOLAANSHAHA WAALIDIINTA** - Arday kasta oo damacsan inuu ka qaybqaato ciyaaraha fudud ee u dhaxeeya dugsiyada sare iyo hor kicidda howlaha sacabba-tumista waa inuu ku haystaa fayl dugsiga dhexdiisa, diiwaanka baarista jireed ee la sameeyay saddexdii (3) sano ee la soo dhaafay. Su'aalo weydiinta caafimaadka waa in si s anadle ah loo buuxiyaa waxa ayna tilmaami karaan baahida loo qabo baaritaanka jireed kahor kaqeybgalka. Saxiixa waalidka ama qofka masuulka ka ah ee oggolaanaya kaqeybgalka ayaa loo baahan yahay.
2. **TAARIIKHDA UGU DAMBEYSA EE LAGU BIIRAYO KOOX** — Si loogu qalmo qeybta iyo tartanka gobolka, ardaygu waa inuu xubin ka ahaado kooxda dugsigaas wax aanan ka dambeynin Isniinta afaraad laga bilaabo bilaabashada rasmiga ah ee xilli-ciyaareedka. Xirfadlayaasha jimicsiga waa in ay ka mid noqdaan kooxda dugsiga ugu dambayn Isniinta saddexaad laga bilaabo bilaabashada rasmiga ah ee xilli-ciyaareedkaas. Marka xilli-ciyaareedka uu bilowdo Isniin, maalintaas waxaa loo tirin

doonaa Isniinta koowaad.

3. **TARTANKA AAN DUGSIGA AHAYN IYO TABABARKA KOOXDA IYO CIYAARAHA SHAKHSIGA AH**

A. **Inta lagu jiro xilli-ciyaareedka Dugsiga Sare:** Inta lagu jiro xilli-ciyaareedka dugsiga sare ardaygu kama qaybqaadan karo xubin kooxeed ahaan ama shakhsi tartame ahaan ciyaaraha aan dugsigu maalgalin, kulamada, is-reereebka ama tartamada, isla hal ciyaar. Qeexitaanka kaqeybgalka: ku celcelinta, tababbarka, istijaabinta, iska-ciyaaridda iyo tartamidda. Qeexitaanka Xilli-Ciyaareedka: Xilli-ciyaareedka dugsiga sarre waxa uu socon doonaa laga bilaabo taariikhda koowaad ee ay howshu bilaaaban karto ilaa kooxda laga saaro tartanka is-reereebka MSHSL. Ciyaarta kubbada usha lagu laado, ciyaarta kubbada weyn ee usha lagu laado ee fudud iyo ciyaarta alwaaxa lagu socdo barafka dushiisa kuma jiraan xeerkan.

**Marka laga reebo:** Tababarka Aanan Dugsiga Sare ahayn ee Xilli-Ciyaareedka Dugsiga Sare ee Ciyaartoyda Uqalma inay Noqdaan u Tartamayaal Gaar ah ee Is-reereebka Gobolka: (Dabbaasha, Orodka Bannaanka, Teeniska, Alwaaxa Lagu Dul Socdo Barafka, jimicsiga Jirka, Lagdinta, Isla Dabbaalashada, Ciyaarta Goolofta, iyo Baratanka)

1. Casharrada/Tababarka: Inta lagu jiro xilli-ciyaareedka dugsiga sare ee MSHSL ciyaartoyda waxa ay casharo kaqadan karaan xirfadlayaasha iyo tababarayaasha kale ee aan dugsiga katirsaneyn iyada oo aysan xaddidnayn meesha, goorta ama cidda bixin karta tababarka. Ciyaartooyda waxaa laga yaabaa in ay kamaqnaan karin tababarka dugsiga sare, ciyaarta ama kulanka si ay uqaataan cashar ama u tababaraan dhacdo aanan dugsiga ahayn. Ciyaartoyda waxa ay casharo ka qaadan karaan iyo ama tababar kaqaadan karaan koox/naadi aanan katirsaneyn dugsiga inta lagu jiro xilliga dugsiga ee isla hal ciyaar.
2. Tartanka: Ciyaartoyda waxa ay awood ulahaan doonaan in ay utartamaan dhacdooyinka/tartamada aanan dugsiga ahayn ee aan ku toosneyn dhacdooyinka ay hadda ciyaartoyda oga tartamaan tartanka dugsiga sare.
   Marka laga reebo: Xilliga Fasaxa Xagaaga — Ardaydu waxa ay kaqeybqaadan karaan tartamada aana ahayn dugsiga, kulamada, ciyaaraha, is-reereebyada isla halka ciyaar ee ay hadda ka ciyaaraan heerka dugsiga sare inta lagu jiro xilliga fasaxa xagaaga. *Hoos ka eeg qeexitaanka fasaxa xagaaga: 14.C.*
   Ka dhaafitaanka Tababaridda Xagaaga: Haddii ardaygu ka qaybqaato koox uu tababare u yahay xubin ka tirsan shaqaalaha tababarka dugsiga sare, xiriirka tabobarku waxa uu dhammaan doonaa Juulaay 31-keeda haddii shuruudda muddo-kordhinta ka dhaafitaanka xagaaga uusan bixin agaasimaha ciyaaraha ee dugsiga.
   Ardaydu waxa casharo gaar ah qaadan karaan inta lagu jiro Xilli-ciyaareedka MSHSL.

B. **Inta Lagu Jiro Sanad Dugsiyeedka, Kahor iyo Kadib Xilli-Ciyaareedka Dugsiga Sare** — Ardaygu waxa uu kaqeybgali karaa tartamada, kulamada ama isree-reebyada si utartame shakhsi ah ahaan ama xubin katirsan koox aanan dugsiga katirsaneyn waa haddii hawlahaan ay ikhtiyaar yihiin oo uusan saameyn ku yeelan ama uusan soo dirin xubin mushahar qaadata ama aan mushahar qaadan oo ka tirsan fasalka labaad ee ardayga, kooxda B, kooxda hoose ee mataleysa dugsiga ama kooxda mataleysa shaqaalaha tababarka ee dugsiga sare.

1. Ardaygu ma isticmaali karo nooc kasto oo dharka dugsiga sare ah.
2. Ardaygu tabaridda ama tababarka maka qaadan karo qof mushaar qaata
   ama aan mushahar qaadan oo ka tirsan fasalka labaad ee ardayga, kooxda B, kooxda hoose ee mataleysa dugsiga ama kooxda mataleysa shaqaalaha tababarka ee dugsiga sare ee ciyaartaas. Ciyaarta usha lagu socdo ee iskudheelitirka jirka, teeniska, jimicsiga jirka, iyo ciyaarta kubbada cagta ee gudaha ah
   waa lagu daray xaddidaadan.
3. Ardaygu waxa uu tababarka casharo gaar ah kaqaadan karaa qof aanan mushaar qaate ahayn ama aan mushahar qaadan oo ka tirsan fasalka labaad ee ardayga, kooxda B, kooxda hoose ee mataleysa dugsiga ama kooxda mataleysa shaqaalaha tababarka ee dugsiga sare ee ciyaartaas.
4. Kharashka ardayga ee laylinta ama tababbarka aan dugsiga ahayn waa in uu bixiyaa ardayga ama ardayga waalidkiisa ama masuulkiisa haddii aysan oggolaan Guddiga Agaasimayaasha.

C. **Xilliga Fasaxa Xagaaga**

Ardaygu waxa uu u tartami karaa si shakhsi ah ama xubin aan ahayn kooxda dugsiga inkasta oo uu utartamayo koox dugsiga sare ah isla hal ciyaar. Xagaaga waxaa lagu qeexaa laga bilaabo1-da bisha Juun ilaa Maalinta Shaqaalaha ee Adduunka. *Xagaaga ciyaaraha kubbadda cagta waa in lagu qeexaa 1-da bisha Juun ilaa Axadda ugu dhaw ee kahorreysa taariikhda bilaabashada rasmiga ah ee xilli-ciyaareedka kubadda cagta dugsiga sare ee MSHSL.*

*Fiiro Gaar ah: Ardaydu waxa ay kaqeyb qaadan karaan hawlaha inta lagu jiro xagaaga, sida kor lagu qeexay, inkasta oo xilli-ciyaareedka dugsigooda sare ee isla halkaas ciyaar uu bilowday. Tusaale ahaan, ardaydu waxa ay ka ciyaari karaan is-reereebka teeniska ee aan dugsiga ahayn iyaga oo isla mar ahaantaana xubin ka ah kooxda dugsiga sare ama waxa ay kaqeybqaadan karaan tartamada waddooyinka iyaga oo isla mar ahaantaana xubin ka ah kooxda tartanka*

*orodada bannaanada ilaa Maalinta Shaqaalaha Adduunka. Ciyaarta kubadda cagta waa laga reebayaa kaqeybgalka laba- geesoodka ah sida kor lagu qeexay.*

**D. Ciqaabta**

1. Xadgudubka Koowaad: Kadib marka la xaqiijiyo xadgudubka koowaad, ardaygu waxa uu lumin doonaa uqalmitaanka ciyaartaas labo (2) tartan oo iskuxiga ee xiga oo dugsiyada u dhexeeya ama labo (2) toddobaad oo kamid ah xilli-ciyaareedkaas, hadba kan weyn. Haddii ay jiraan wax kayar labo (2) dhacdo oo ka dhiman ciyaartaas, luminta uqalmitaanka waxaa loo rari doonaa xilli ciyaareedka xiga ee ciyaartaas. Fiiro Gaar ah: Tani waxa ay ka dhigan tahay ardaygi jebiya xeer hoosaadyada marka la joogo dhammaadka hal xilli-ciyaareed uu lumin doono uqalmitaanka labo (2) ciyaar oo kamid ah xilli-ciyaareedka soo socdo ee uu ardaygu kaqeybgalayo.
2. Xadgudubka Labaad: Kadib marka la xaqiijiyo xadgudubka labaad, ardaygu waxa uu lumin doonaa uqalmitaanka ciyaartaas lix (6) tartan oo iskuxiga ee xiga oo dugsiyada u dhexeeya ama saddex (3) toddobaad, hadba kan weyn.
3. Xadgudubka Saddexaad: Kadib marka la xaqiijiyo xadgudubyada saddexaad ama ka dambeeya, ardaygu waxa uu lumin doonaa uqalmitaanka ciyaartaas labo iyo toban (12) tartan oo iskuxiga ee xiga oo dugsiyada u dhexeeya ama afar (4) toddobaad, hadba kan weyn.
4. Ganaaxyadu waa kuwo is daba joog ah oo isku xig-xiga.

**E. Tixgalinada gaarka ah**

1. Kooxaha Qaranka iyo Barnaamijyada Horumarinta Olombikada
   MSHSL waxaa laga yaabaa inay ogolaato ka qayb galka ardayda dugsiga sare ee kooxaha qaranka saxda ah ama barnaamijyada horumarinta Olombikada haddii:
   a. Barnaamijka waxaa ansixiya oo taageera guddiga heerka qaran ee maamula ciyaaraha ama haddii uu jiro barnaamijka horumarinta Olombikada ee tababarka iyo tartanka.
   b. Waxaa si toos ah u maalgeliya guddiga qaran ee maamula ciyaaraha oo heer qaran ah.
   c. Waxaa oggolaada guddiga heerka qaran ee maamula ciyaaraha ee ciyaartooyda awoodda u leh ka qaybgalka xulka qaranka ee mustaqbalka.
   Ardayda lagu casuumo inay kaqeybgalaan Xulka Qaranka ama Barnaamijyada Horumarinta Olombikada waa inay la xariiraan maamulaha dugsigooda sare si ay oga helaan foomka codsiga. Tani waa in lagu buuxiyaa ugu yaraan soddon (30) kahor kaqeybgalka.
2. Inta lagu guda jiro sanad dugsiyeedka, ardayda ciyaar ooga qeyb qaato dugsigooda waxa ay kaqayb qaadan karaan tababarka, istijaabinta ama tartanka Xulka Qaranka ama Barnaamijyada Horumarinta Olombikada Mareykanka waa hadii ardaygu kahelo casuumaad shaqsi ah Guddiga Olombikada Mareykanka ama Guddiga Qaran ee Maamula Ciyaaraha Mareykanka ee heerka qaran ee ciyaartaas.
3. Ardayda buuxisa uqalmitaankooda ciyaarta waa laga reebay tartanka aan dugsiga ahayn iyo sharciyada tababarka ciyaartaas.

**4. XERYAHA CIYAARAHA IYO RUGAHA CAAFIMAADKA**

**A. Sanad Dugsiyeedka** — Ardayda waxa ay xaadiri karaan xerooyinka ciyaaraha iyo rugaha caafimaadka kuwaas oo uu oggolaaday mamulaha dugsigooda sare.

**B. Xilliga Fasaxa Xagaaga** — Xerooyinka ciyaaraha gaarka ah ee aan dugsiga ahayn iyo rugaha caafimaadka ma ubaahna ogolaanshiyo.

1. Kharashka xerada ama rugta caafimaad ee uusan dugsigu soo qabanqaabin waa in uu bixiyaa ardayga ama ardayga waalidkiisa ama qofka masuulka ka ah haddii is-afgarad kale aysan oggolaan Guddiga Agaasimayaasha.
2. Ardaygu waxaa uu tagi karaa xerada ama rugta caafimaadka oo xubin ka mid ah shaqaalaha tababarka ee dugsiga (fasalka labaad, kooxda B, kooxda hoose eemataleysa dugsiga ama kooxda mataleysa dugsiga) ee ciyaartaas uu leeyahay, maamulo, agaasimo, abaabulo, ama uga shaqeeyo macalin ama xubin katirsan shaqaalaha ahaan inta lagu jiro soo xaadiritaanka ardayga.

**C. Ciqaabta**

1. Xadgudubka Koowaad: Kadib marka la xaqiijiyo xadgudubka koowaad, ardaygu waxa uu lumin doonaa uqalmitaanka ciyaartaas labo (2) tartan oo iskuxiga ee xiga oo dugsiyada u dhexeeya ama labo (2) toddobaad oo kamid ah xilli-ciyaareedkaas, hadba kan weyn. Haddii ay jiraan wax kayar labo (2) dhacdo oo ka dhiman ciyaartaas, luminta uqalmitaanka waxaa loo rari doonaa xilli ciyaareedka xiga ee ciyaartaas. Fiiro Gaar ah: Tani waxa ay ka dhigan tahay ardaygi jebiya xeer hoosaadyada marka la joogo dhammaadka hal xilli-ciyaareed uu lumin doono uqalmitaanka labo (2) ciyaar oo kamid ah xilli-ciyaareedka soo socdo ee uu ardaygu kaqeybgalayo.
2. Xadgudubka Labaad: Kadib marka la xaqiijiyo xadgudubka labaad, ardaygu waxa uu lumin doonaa uqalmitaanka ciyaartaas lix (6) tartan oo iskuxiga ee xiga oo dugsiyada u dhexeeya ama saddex (3) toddobaad, hadba kan weyn.

3. Xadgudubka Saddexaad: Kadib marka la xaqiijiyo xadgudubyada saddexaad ama kuwa xiga, ardaygu waxa uu lumin doonaa uqalmitaanka ciyaartaas labo iyo toban (12) tartan oo iskuxiga ee xiga oo dugsiyada u dhexeeya ama afar (4) toddobaad, hadba kan weyn.

5. **XEERKA BADDALASHADA —** Xeer hoosaadka 111

A. Ardayga soo beddeshay waxa uu u qalmi karaa tartanka kooxda mataleysa dugsiga waa haddii ardaygu ku sugnaa Dhaqan Wanaagsan taariikhda laga soo bixiyay dugsigii u dambeeyay ee ardaygu dhiganayey iyo mid (1) kamida qodobbada Qaybta B (hoose) la buuxiyo.

B. Ardayga soo beddeshay waxa uu u qalmi karaa tartanka kooxda mataleysa dugsiga haddii:

1. Doorashada Fasalka 9-aad: Ardaygu iska diiwaangelinayo fasalka 9-aad markii ugu horeysay.
2. Isbeddelka Deganaanshaha Qoyska: Soo baddalashada ardayga oo uu kasoo beddesho goobta soo xaadiritaanka ee dugsi degmo oo dadweeyne oo uu usoo beddesho goobta soo xaadiritaanka ee dugsi degmo oo dadweeyne oo kale waqti kasta inta lagu jiro kalandarka sanadka oo ay jiraan isbeddel deggenaansho iyo degitaan gudaha Minnesota oo ay sameeyeen waalidiinta ardayga. Haddii waalidka ardaygu ka guuro goobta soo xaadiritaanka ee dugsi degmo oo dadweeyne oo uu usoo guuro goobta soo xaadiritaanka ee dugsi degmo oo dadweeyne oo kale, ardaygu waxa uu xaq u yeelan doonaa dugsiga dadweynaha ee goobta soo xaadiritaanka cusub ama dugsi aan dugsi dadwayne ahayn haddii ardaygu beddesho isla waqtiga ardayga waalidkiisa ay meel cusub soo dagaan. (Fadlan ka eeg Qeexitaannada wixi sharraxaad dheeraad ah.)
AMA
Haddii waalidiintu ka guuraan goobta soo xaadiritaanka ee dugsi degmo oo dadweeyne oo uu usoo guuro goobta soo xaadiritaanka ee dugsi degmo oo dadweeyne oo kale, ardaygu waa inuu sii ahaadaa inuu si buuxda ugu qalmo haddii ardaygu sii wato diiwaangelinta dugsigii hore inta ka hartay xilliga soo gudbinta buundooyinka ee hadda socda ama inta ka hartay sanad dugsiyeedka waxbarashada. Haddii uu ardaygu doorto midkood xulashooyinka diiwaangelintahadda jira ee kore, ardaygu waxa uu ugu qalmi doonaa si buuxdo marka uu usoo baddasho dugsiga cusub ee goobta soo xaadiritaanka ee dugsi degmo oo dadweeyne ee meesha waalidiinta ardayga ay daggan yihiin ama dugsga aanan ahayn dugsi dadweyne.
Ardayga doorta in uusan badalan marka ay waalidiintu deegaan kale u guuraan waxa uu sii wadan doonaa inuu uga qalmo dugsiga uu ardaygu hadda ka diiwaan gashan yahay.
3. Beddelka Deganaanshaha ee ay Maxkamadu amartay Si Loogu Ilaaliyo Ilmaha: Hoyga ardayga waxaa loo beddelaa iyadoo la raacayo amarka ilaalinta ilmaha ee meelaynta guriga lagu koriyo, ama amarka kama dambaysta ah ee maxkamadda carruurta.
4. Waalidiinta Isfuray: Ardayga waalidiintiisa ay isfureen ama waalidiinta aanan weli isguursan, ardaygaas oo la daggan mid kamid ah waalidiinta oo u wareega inuu la dago waalidka kale waxa uu uqalmi doonaa waqtiga u wareegidda:
   a. Dugsiga dadweynaha ee ku yaal goobta soo xaadiritaanka ee dugsiga degmo oo dadweeyne ee cusub sida ay go'aamiyeen guddiga dugsiga degmada halkaas oo uu guriga cusubi ku yaalo; ama
   b. Dugsi kasta oo aan ahayn dugsi dadweyne.
   Ardaygu waxa uu isticmaali karaa bixintan hal mar oo kaliya inta lagu jiro fasallada 9-12 oo dhan.
   Hoyga cusub kuma yaali karo isla degaanka goobta soo xaadiritaanka ee dugsi degmo oo dadweeyne ee hoygi hore.
   *Fadlan La Soco: Bixintani waxaa kaliya lagu dabaqi karaa marka ugu horreysa ee ardaygu u kala wareego waalidiinta oo uu beddesho dugsiga iyo kaliya haddii shuruudaha gaarka ee bixintani la buuxiyo. Ujeedada bixintani waa in lagu bixiyo tartanka uqalmitaanka kooxda dugsiga ee ardayga (kaliya) la nool hal waalid oona raba inuu u wareego si uu ula noolaado waalidka kale. Intaa waxaa dheer, ardayga waalidiinta kala tagay, oo la daggan mid kamid ah waalidiinta oo u wareega inuu la dago waalidka kale waxa uu uqalmi doonaa waqtiga u wareegidda.*
5. Ka Guuritaanka Gobolka: Haddii waalidka ardaygu ku soo guuro Minnesota iyaga oo ka imaanaya gobol ama waddan ka baxsan Minnesota iyo haddii ardaygu guuro isla wakhtigaas waalidku deggenaansho ka samaysto agagaarka goobta soo xaadiritaanka dugsigga dadweynaha ee Minnesota, ardaygu waxa uu uga qalmi doonaa dugsiga ugu horreeya ee ardaygu ka dhigto Minnesota.

C. Haddii bixinta Xeerka Ciyaartoyga 5.B.1-5 (ee kore) aanan midna la buuxin, ardaygu ma uqalmayo tartanka kooxda mataleysa dugsiga muddo hal (1) sano oo kalandarka ah oo ka bilaabmaya maalinta ugu horreysa ee soo xaadirista dugsiga cusub.

1. Ardaydu waxa ay isla markiiba uqalmayaan tartanka aan ahayn heerka matalaada kooxda dugsiga.

2. Ardaygu ma heli karo uqalmitaanka iyada oo ay sabab u tahay baddalka. Haddii wakhtiga beddeleshada ardaygu aanu si buuxda uga qalmin dugsigii hore, ardaygu uguma qalmi doono dugsiga cusub. Ardayga aan ku sugnayn dhaqan wanaagsan wakhtiga bedeleshada waxa uu noqon doonaa mid aan u qalmin ilaa laga gudanayo ganaaxii dugsigii hore.
3. Baddalashada Badan: Ardayga ku maqan ganaaxa ka joojinta tartanka kooxda mataleysa dugsiga iyada oo ay sabab u tahay baddalka iskuulka waxa uu yeelan doonaa ganaaxa dheeraadka ah ee ka joojinta tartanka kooxda mataleysa dugsiga baddal kasta oo xiga (dheeraad ah) oo uu ka badasho dugsiga. Ganaaxa ka joojinta tartanka kooxda mataleysa dugsiga oo hal sano ah, oo cusub waxa uu bilaabmi doonaa maalinta koowaad ee soo xaadirista ama maalinta u horreysa ee kaqeybgalka tababarka ciyaarta deyrta ee dugsiga cusub mar kasta oo ardaygu beddesho.

D. Barnaamijka Xulashooyinka Diiwaangelinta: Ardayga isticmaala Qaanuunka Minnesota 124D.03 ee Barnaamijyada Xulashooyinka Diiwaangelinta, oona beddesha iyadoo aysan jirin guri bedeleshada lamidka ah ee waalidka ardayga waa in uu doortaa mid ka mid ah xulashooyinka ka qaybgalka ee lagu tilmaamay hoos:
1. Waa inuu haystaa uqalmitaanka buuxa ee tartanka kooxda mataleysa dugsiga muddo hal (1) sano oo kalandarka ah ee dugsiga laga diiwaangeliyey ardayga
kahor soo baddalashada oo waqtigaas kadib ardaygu waxa uu si buuxda ugu qalmi doonaa dugsiga uu ardaygu u baddashay; ama
2. Waa inuu uqalmaa kaliya heerka aanan kooxda dugsiga ahayn ee dugsiga uu ardayga usoo baddashay oo muddo hal (1) sano oo kalandarka ah.
3. Kaqeybgalka waxaa lagu qeexaa ku celcelinta, tababbarka, iska-ciyaaridda, istijaabinta iyo tartamidda.

E. Siyaasadda Ku Noqoshada Dugsigi Hore: Ardayga ka soo beddelenaya mid ka mid ah dugsiyada xubnaha ka ah MSHSL una beddelanaya mid kale oo MSHSL xubin ka ah uma qalmi karo tartan kooxeedka ilaa shan iyo toban (15) maalmood oo kalandarka ah laga bilaabo maalinta ugu horreysa ee ardaygu xaadiro tababarka xilliga dayrta ama uu xaadiro xiisadaha dugsiga cusub markii ugu horreyso.
1. Marka uu beddesho, ardaygu uma qalmi doono dugsigii hore waxaana uu ku tababaran karaa dugsiga cusub laakiin l agama yaabo inuu ku tartamo kooxda mataleysa dugsiga ee kasta oo dugsiga cusub ah.
2. Ardaygu waxa uu sii haysan doonaa uqalmitaanka buuxa ee dugsigii hore haddii ardaygu doorto inuu ku laabto dugsigii hore inta lagu jiro
shan iyo tobankii (15) maalmood ee taariikh ahaaneed.
3. Haddii ardaygu ku sii sugnaado dugsiga cusub, ka dib shan iyo toban (15) maalmood gudahood, ardaygu waxa uu noqonayaa
mid u qalma heerka kooxda mataleysa dugsiga kaliya marka ardaygu si buuxda ah u buuxiyo dhammaan shuruudaha beddeleshada oo xaafiiska dugsiga cusub iyo Horyaalkuba u arkaan inuu u qalmo.
4. Haddii mid kamid ah shuruudaha baddalashada aanan la buuxin, ardaygu ma uqalmi doono tartanka kooxda mataleysa dugsiga ee dugsiga cusub
waana inuu markaa kadib kala doortaa uqalmitaanka kooxda mataleysa dugsiga ee dugsigi hore ama JV uqalmitaanka dugsiga cusub.
5. Ardaygu waxa uu dooran karaa inuu diido muddada shan iyo tobanka (15) maalin si uu ugu qalmo tartanka heerka kooxda mataleysa dugsiga ee Dugsiga Qaabilaya marka maamulka dugsiga ay go'aamiyaan in ardaygu buuxiyey dhammaan shuruudaha uqalmitaanka kaqeybgalka kooxda mataleysa dugsiga.
6. Ardaygu wuxuu cuskan karaa qodobkan hal mar 365 maalin kalandar oo kasta.

# TALOOYINKA MAAREYNTA MIYIR-BEELKA EE CIYAARAHA MSHSL

Dhaawac daran
Marka ciyaartoygu muujiyo wax calaamado ama astaamo oo miyir-beel ah, waxa soo socda waa in lagu dabaqaa.

1. Ciyaartoyga waa inaan loo fasaxin inuu ku laabto inuu ciyaaro ciyaarta ama tababarka hadda socda.
2. Ciyaartoyga waa in aanan looga tagin cidlo, dabaggal joogto ahna waa daruuri si aysan xaaladdu kaga sii darin dhowrka saac ee hore kaddib dhaawaca.
3. Ciyaartoyga waa in caafimaad ahaan la baaraa dhaawaca kadib.
4. Ku laabashada ciyaarta waa in loo maraa hab tallaabo caafimaad ah oo la kormeerayo.

Ciyaartoygu waa inuusan marnaba kulaaban ciyaarta isaga oo astaamihi ay ka muuqdaan. "Marki laga shakiyo, bannaanka fadhiisiya!"

**Baratokoolka kulaabashada ciyaarta**
Ku laabashada ciyaarta kadib jug madaxa ah waxay ubaahan tahay bogsashada dhammaan astaamaha iyo dhammeystirka baratokoolka jimicsi tallaabo-tallaabo ah.  Tallaabo kasta waxa ay ubaahan tahay ugu yaraan 24 saacadood.  Haddii wax calaamado ama astaamo ah soo laabtaan, ciyaartoygu waa inuu ulaabtaa heerki hore.

Ciyaartoyga waxa uu tababarka iyo tartanka uu ku laaban karaa oo kaliya marka uu:  1) xor ka yahay dhammaan astaamaha iyo calaamadaha waqtiga nasiinada iyo inta lagu jiro jimicsiga, 2) dhammeystiray baratokoolka jimicsiga tallaabo-tallaabada ah iyo 3) dugsiga ku laabtay maalmo buuxo.

Ku soo labashada ciyaarta kaddib miyir-beelka waxa ay raacaysaa habraac tallaabo-tallaabo ah:

1. Howl ma jirto, nasiino buuxda ilaa dhaammaan calaamadaha baaba'aan. Marki calaamadaha laga waayo, ugudub heerka 2-aad.
2. Jimicsi fudud oo neefta badiya sida socodka ama baaskiilka aan dhaqaaqin, aysan jirin tababar iska caabin ah.
3. Jimicsiga gaarka ah—tusaale ahaan, ku socoshada xeegada, orodka kubbada cagta, kor u kaca tababarka iska caabinta 3 ama 4 tallaabo ah.
4. Layliska tababbarka aan la istaabaneynin.
5. Tababarka istaabashada buuxa ah ka dib fasaxa caafimaadka.
6. Habka ciyaarta.

Kulaabashada u dambeysa ee go'aanka tartanka waxa uu ku xiran yahay go'aaminta caafimaad oo ciyaartoyguna waxa uu kaliya kulaaban karaa oggolaansho qoraal ah oo uu kahelo daryeel bixiye caafimaad kaas oo diiwaangashan, ruqsad haysta, shahaadeysan, ama haddii kale sharci ahaan uu u oggolaay gobolka inuu bixiyo daaweynta caafimaad, loo tababaray oona khibrad u leh qiimeynta iyo maareynta miyir-beelka; oona ku shaqaynaya xeyndaabka tababarka caafimaadka ee qofka iyo baaxadda kudhaqanka.

Baaritaanka neerfayaasha ama baaritaanka iskudheelitirka ayaa ka caawin karta go'aanka kusoo noqoshada ciyaarta waxaana la isticmaali karaa ka dib marka ciyaartoygu ay calaamaduhu ka dhamaadaan, laakiin baaritaannada looma baahna si ciyaartoyga calaamaduhu ka dhammaadeen ugu soo laabto inuu ciyaaro.
Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan u tixraac tixraacyada hoos ku taxan.

**Calaamadaha ay ka Eegaan Shaqaalaha Tababarka**

- U muuqashada mid wareersan oo yaaban
- Hilmaamidda ciyaaridda ciyaarta
- ku wareersanaanta shaqada loo dhiibay ama booska
- Ma hubo ciyaarta, dhibcaha, ama kooxda kasoo horjeeda

- Kadhacsanaanta socdoka
- Lumitaanka miyirka (xitaa waxyar)
- Xasuusan karin dhacdooyinka kahorreeya marka ay wax kudhacaan ama kufitaanka
- Tartiib uga jawaabidda su'aalaha
- Muujinta isbaddalka habdhaqanka ama dabeecadda
- Xasuusan karin dhacdooyinka kadambeeya marka ay wax kudhacaan ama kufitaanka

Calaamadaha uu soo sheego Ciyaartoyga

- Madax xanuun ama "culeys" saaran madaxa
- Dhibaatada iskudheelitirka ama dawakhsanaanta
- Dhibitaanka iftiinka
- Dareemidda cajiska, wahsiga, indho-humaaga, ama sarkhaansanaata
- Jahwareerka
- Lalabbada ama matagga
- Humaag fuula araga ama laban laabma
- Dhibitaanka buuqa
- Dhibaatooyinka xoog saaridda ama xusuusta
- Ma "dareemo saxsanaan"

# Bayaanka Uqalmitaanka MSHSL ee 2023-2024

**Dhammaan go'aannada uqalmitaanka MSHSL waxaa lagu saleeyaa buug-gacmeedka rasmiga ah ee hadda jira ee barta webseedka MSHSL: www.mshsl.org/about/mshsl-handbook**

***Bayaanka uu saxiixayo kaqeybgalaha ka socda dugsiga xubinta ka ah MSHSL iyo waalidka ama qofka masuulka ka ah kaqeybgalaha sanad dugsiyeed kasta kahor kaqeybgalka sanadkaas.***
***Fadlan sax saar dhammaan sheeyaasha:***

☐ Waan akhriyey, fahmay, oo garowsanahay helitaanka Buugyaraha Uqalmitaanka MSHSL 2023-2024, kaas oo ay kujiraan kaliya nuxurka soo koobista xeerarka uqalmitaanka Horyaalka Dugsiga Sare ee Gobolka Minnesota. Waxaan fahamsanahay in nuqul ka mid ah Buug-gacmeedka Rasmiga ah ee MSHSL uu fayl ugu jiro agaasimaha ciyaaraha fudud ee dugsiga sare iyo ama maamulaha iyo in aan dib u eegi doono, gebi ahaantiisaba, haddii aan sidaas doorto.

☐ Annaga, ardayga iyo waalidka, waxa aan dib u eegis ku sameynay Talooyinka Maareynta Miyir-beelka ee Ciyaaraha MSHSL ee kujira Buug-yaraha Uqalmitaanka iyo webseedka soo socdo: www.cdc.gov/headsup

☐ Waxaan fahamsanahay in marka aan saxiixo bayaanka uqalmitaanka in dhammaan sharciyada uqalmitaanka ay khuseeyaan:
- 12-ka bilood ee sanadka;
- Haddii aan hadda kaqeybqaadanayo iyo haddii kaleba;
- Si joogta ah laga bilaabo saxiixa u horreeya ee bayaanka ilaa dhammaadka uqalmitaankeyga ee dugsiga sare.

☐ Iyada oo aanan loo eegeynin da'deyda waxaan oggolaanayaa inaan raaco dhammaan xeerar hoosaadyada MSHSL si aan ugu qalmo inaan dugsigeyga ku matalo hawlaha uu soo qabanqaabiyo Horyaalka.

☐ Waxaan sidoo kale fahamsanahay in dugsiga xubinta ka ah MSHSL ay tahay inuu u hoggaansamo dhammaan xeerarka iyo qawaaniinta la xiriira ciyaaraha fudud/hawlaha Horyaalka ee uu dugsigu soo qabanqaabin karo iyo in xeerarka maxalliga ahi ay noqon karaan kuwo adag, oo ka ciqaab culus, marka loo eego xeerarka MSHSL.

**XEERKA MASUULIYADAHA ARDAYDA**

☐ Ka ahaan arday kaqeybqaadanaya waxqabadyada dugsiyada u dhexeeya ee dugsigeyga, waxaan fahamsanahay oo aqbalayaa masuuliyadaha soo socdo:
- Waxaan ixtiraami doonaa xuquuqda iyo waxa ay aaminsan yihiin dadka kale waxaana ula dhaqmi doonaa kuwa kale si qadarin iyo tixgelin leh.
- Waxaan si buuxda masuul ooga noqon doonaa ficiladeyda iyo cawaaqib xumada kadhalata ficiladeyda.
- Waxaan ixtiraami doonaa hantida dadka kale.
- Waxaan ixtiraami doonaa oo adeeci doonaa xeerarka dugsigeyga iyo shuruucda bulshadeyda, gobolkeyga iyo wadankeyga.
- Waxaan ixtiraam u muujin doonaa dadka masuulka ka ah dhaqangelinta xeerarka dugsigeyga iyo shuruucda bulshadeyda, gobolkeyga iyo wadankeyga.

  Ardayga dabeecadiisa ama habdhaqankiisa ay jabineyso Xeerka Masuuliyadaha Ardayga ama laga joojiyey ama laha ceyriyey meel wanaagsan kuma jiro mana uqalmo muddo waqti ah sida uu go'aamiyo maamulaha. Iyada oo uu ardaygu kujirin xaalad wanaagsan, ardaygu ma qaadan karo wax ciqaab ah oo ah jebinta xeer hoosaadka MSHSL.

☐ *Oggolaansho Xog Ogaal ah:* Dabeecad ahaanteeda, kaqeybgalka ciyaaraha fudud ee dugsiyada u dhexeeya waxaa kamid ah halista soo gaaritaanka dhaawac iyo isugudbinta cudurada faafa sida HIV, Cadhada iyo Cagaarshowga iyo kuwa kale oo badan. Inkasta oo aysan badneyn dhaawacyada halista ah, halista isku gudbinta cudurka HIV kudhawaad waa mid aananba ka jirin barnaamijyada ciyaaraha fudud ee dugsiga ee la kormeero, waa mid aanan suuragal ahayn in meesha laga wada saaro dhammaan khatarta. Kaqeybgalayaasha waxa ay masuuliyad ka saaran tahay inay gacan kageystaan yareynta khatartaas. Kaqeybgalayaashu waa inay adeecaan dhammaan shuruucda badbaadada, dhammaan dhibaatooyinka jireed ama nadaafadeed usoo sheegaan tababarayaashooda, raacaan barnaamijka tababarka jirka ee ku habboon, oo ayna maalin kasta kormeeraan qalabkooda. **WAALIDIINTA, MASUULIYIINTA AMA ARDAYDA AANAN RABIN INAY AQBALAAN HALISTA LAGU QEEXAY DIGNIINTAN DHEXDEEDA WAA IN AYSAN**

**SAXIIXIN FOOMKAN. ARDAYDA MAKA QEYBGALI KARAAN HAWL AY SOO QABANQAABISAY MSHSL IYADA OO AYSAN JIRIN SAXIIXA ARDAYGA IYO WAALIDKA/MASUULKA.**

☐ Waxaan u oggolaanayaa tababaraha ciyaartoyga ama tababaraha daaweynaya dhaawacyada waxaana u fasaxayaa inay dhaawacyadaas kala hadlaan oo ayna xog kasta oo caafimaad ama diiwaanka ee la xariirta dhaawacyadaas siiyaan tababarayaasha, shaqaalaha dugsiga iyo bixiyeyaasha kale ee daryeelka caafimaadka u qalma ee loo arko inay lagama maarmaan u tahay xeyndaabka dhaqankooda.

## Bayaanka Uqalmitaanka MSHSL ee 2023-2024-2024 (sii socdo)

☐ Waxaan sidoo kale fahamsanahay in kiiska dhaawaca ama jirrada ubaahan gaadiid lagu geeyo xarunta daryeelka caafimaadka, in iskuday macquul ah la iskudayi karo si loola xariiro waalidka ama qofka masuulka ka ah marka ay timaado in ardayga-ciyaartoyga uu ilmo yar yahay, laakiin taasi, haddii loo baahdo, ardayga-ciyaartoyga gaadiidka ambalaasta loogu qaadi doono isbitaalka ugu dhow.

☐ Marka aan halkan saxiixno waxa aanu qireynaa inaan akhrinay macluumaadka kujira Bayaanka iyo Buugyaraha Uqalmitaanka MSHSL ee 2023-2024.

☐ Aniga/annagu waxaanu qireynaa in saxiixa elegtarooniga ahi uu xaqiijinayo in aan akhriyay/akhrinay oo aan dib u eegay/eegnay macluumaadka ku jira nuxurka Bayaanka iyo Buugyaraha Uqalmitaanka MSHSL. Aniga/annagu waxaanu sidoo kale qireynaa in saxiixa elegtarooniga ahi uu leeyahay saamayn sharci oo la mid ah, ansixitaan, iyo dhaqangal la mid ah saxiixa aanan ahayn qaabka elegtaroniga.

**Ardayga/waalidku waxa ay oggolaanayaan siideynta dukumiintiyada iyo macluumaadka kale ee khuseeya dugsiga si loo go'aamiyo uqalmitaanka ardayga. Intaa waxaa dheer, ardayga/waalidku waxa ay fahamsan yihiin oo ay aqbalayaan in macluumaadka bannaanka lasoo dhigayo ay kujiri doonaan magacyada iyo sawirada ardayga kaqeybgalaya ama tagaya hawlaha kabaxsan manhajka, dhacdooyinka dugsiga, iyo hawlaha ama dhacdooyinka Horyaalka Dugsiga Sare.**

Waxaan ahay arday iskuulka guriga loogu dhigo? **HAA** ☐ **MAYA** ☐
Waxaan ahay arday onlaynka wax ku dhigto? **HAA** ☐ **MAYA** ☐

_______________________________________________

*Magaca Ardayga oo Far Waaweyn ah* *Taariikhda Dhalashada* *Fasalka uu kadhigto Dugsiga*

_______________________________________________

*Saxiixa Ardayga* *Taariikhda*

_______________________________________________

*Saxiixa Waalidka ama Qofka Masuulka Ka ah* *Taariikhda*

# SU’AALO WEYDIINTA CAAFIMAADKA CIYAARO SANADEEDKA MSHSL EE 2023-2024

**Magaca** ________ ________ ___________ _____ **Taariikhda Dhalashada** __/__/_____ **Taariikhda** ___/___/_____

**Taariikhda** __ **Fasalka** ________________________________________ **Ciyaar(o)** ________________________________________________________

**Fasalka** ________________________________________________________________________________________________________

**Ciwaanka meesha aad dagan tahay** __________ **Taariikhdi ugu Dambaysay ee Sports Qualifying Physical Exam (Baaritaanka Jirka ee Uqalmitaanka Ciyaaraha, SQPE)** ___________ / / ____________________________________________________________

Sax saar sanduuqyada kuqoran Haa ama Maya ee su’aal kasta ama Goobo geli nambarada su’aalaha aadan ka jawaabi karin.

**<u>SANADKI LASOO DHAAFAY,</u> laga soo bilaabo tan iyo marki aad martay Baaritaanka Jirka ee Uqalmitaanka Ciyaaraha ee dhakhtarkaaga ama Su’aalo Weydiinta Caafimaadka Sannadlaha ah ee Sanadkaaga 2-aad, <u>MA LAHAYD WAX ISBADALLO AH OO KU YIMID SU’AALAHA SOO SOCDO:</u>**

<u>Su’aalo Weydiinta Caafimaadka Ciyaartoyga</u>

| | | HAA | MAYA |
|---|---|---|---|
| 1. | Sanadki lasoo dhaafay, dhakhtar ma kaa reebay kaqeybqaadashada ciyaaraha sababti kasta ee ay noqotaba isaga oo aan kuu caddeyn inaad ku noqoto ciyaaraha? | ☐ | ☐ |
| | SU'AALAHA CAAFIMAADKA WADNAHA MUHIIMKA AH EE KU SAABSAN ADIGA SANADKI LASOO DHAAFAY | | |
| 2. | Sanadki la soo dhaafay, miyaad suuxday ama suuxi gaartay inti lagu jiray ama kadib jimicsiga? | ☐ | ☐ |
| 3. | Sanadki la soo dhaafay, maka dareentay culeys, xanuun, ciriiri, ama cadaadis saaran xabadkaaga inti lagu jiray jimicsiga? | ☐ | ☐ |
| 4. | Sanadki la soo dhaafay, miyuu kordhay ama bood-booday wadna garaacaagu (garaac aan joogto ahayn) inti lagu jiray jimicsiga? | ☐ | ☐ |
| 5. 0 | Sanadki la soo dhaafay, ma dareentay xoogaa fudeyd madaxa ah ama neefsasho gaagaan oo ka badan intii la filayey inti lagu jiray jimicsiga? | ☐ | ☐ |
| 6. | Sanadki la soo dhaafay, ma ku qabtay qallal aanan la sharraxin? | ☐ | ☐ |
| | SU'AALAHA CAAFIMAADKA WADNAHA MUHIIMKA AH EE KU SAABSAN QOYSKAAGA SANADKI LASOO DHAAFAY | | |
| 7. | Sanadki la soo dhaafay, qof kamid ah qoyskaaga soke si kadis ah ma u dhintay oo aan la fileynin iyada oo aysan jirin sabab cad? | ☐ | ☐ |
| 8. | Sanadki la soo dhaafay, qof katirsan qoyska ama qaraabo kula ah ma u dhintay xanuun xagga wadnaha ah ama ma u dhintay si kadis ah oo aan la fileynin ama aanan la sharraxin kahor da’da 35 sano (oo ay ku jiraan ku qarqashada biyaha ee aan la sharraxin ama shil gaari oo aan la sharraxin)? | ☐ | ☐ |
| 9. | Sanadki la soo dhaafay, qof kamid ah qoyskaaga soke ma lahaa xanuuno aanan la sharraxin ee ah suuxdin, qallal, ama ku qarqashada biyaha? | ☐ | ☐ |
| 10. | Sanadki la soo dhaafay, qof kamid ah qoyskaaga soke malaga helay xannuunka murqaha wadnaha adeyga noqda, Cillada la iska dhaxlo ee Isbaddalka kuyimaada Sameyska Jirka, cillada xirmashada qeybta midig ee wadnaha, xanuunka qabatinka dheer ama gaaban ee QT, Xanuunka Wadna Garaaca ee aadka u daran, ama xanuunka khalkhalka wadnaha? | ☐ | ☐ |
| 11. | Sanadki la soo dhaafay, qof kamid ah qoyskaaga soke oo kayar da’da 35 sano ma lahaa xanuun xagga wadnaha ah, qalabka macmalka ee soo saara garaaca wadnaha, ama qalabka macmalka ah ee la socda garaaca wadnaha oo la galiyey? | ☐ | ☐ |
| | SU'AALAHA HALISTA CAAFIMAAD EE SANADKII LASOO DHAAFAY | | |
| 12. | Sanadki lasoo dhaafay, ma kugu dhacay dhaawac madaxa ah ama miyir dabool oo weli leh astaamaha sida madax xanuun joogta ah, dhibaatooyin xagga xoog-saaridda ama dhibaatooyinka xusuusta? | ☐ | ☐ |
| 13. | Sanadki lasoo dhaafay, ma kugu dhacay xanuunka COVID-19 oo lahaa neefsashada oo kudhibeysay; culeys joogto ah oo kaa saaran xabadka; wareer, Awood l a’aanta inaad soo jeeddo; qandho daran in kabadan 4 maalmood; maqaarka jirka, bishimaha, ama ciddiyaha hoostooda oo leh midabo caddeys, cawl, ama buluug; ama isbitaal dhigis oo aanan laguu oggolaan inaad ciyaaraha dib ugu noqoto oo uu kuu sheegay dhakhtar? | ☐ | ☐ |

Waalidiinta ama Masuuliyiinta Sharciga ah: Fadlan hoos ku xus walaac kasta oo caafimaad, daaweyn, ama alarji oo laga yaabo inuu muhiim yahay si macalimiinta tababarka ama agaasimaha ciyaarta/hawlaha uu u ogaado.

________________________________________________________________________________________________________

________________________________________________________________________________________________________

Ma garanayo wax sabab caafimaad ah oo jireed ama dheeraad ah oo jirta oo iga hor istaageysa kaqeybqaadashada ciyaaraha. Waxaan cadeynayaa in jawaabaha aan ka bixiyey su’aalaha kore ay yihiin kuwo run iyo sax ah waxaana oggolaanayaa kaqeybqaadashada hawlaha ciyaaraha fudud.

_______________________________ _______________________________ _______________

Saxiixa Waalidka ama Qofka Masuulka ka ah Taariikhda

**Fiirada Gaarka ah ee Agaasimaha Hawlaha: (jawaab HAA ah ee mid ka mid ah su'aalaha kore Waxa ay ubaahan tahay qoraal caddeyn ah oo kasocdo dhakhtar kahor ka qaybgalka.)**

________________________________________________________________________________________________________

________________________________________________________________________________________________________

________________________________________________________________________________________________________

**SQPE La Filayo** ___ / ______/ _____ **CAAFIMAAD AHAAN UQALMA KAQEYBGALKA CIYAARAHA: HAA** ☐ **MAYA** ☐

Su'aalaha Baaritaanka Caafimaadka Maskaxda ee Dheeraadka ah (waxaa laga yaabaa in laga gooyo foomka ka hor inta aan la gudbin)

*Labadi toddobaad ee lasoo dhaafay, ilaa intee in la'eg ayey ku dhibeen mid kasta oo kamid ah dhibaatooyinka soo socda? (Goobo geli jawaabta.)*

| | Maya haba yaraatee | Dhowr maalmood | In ka badan kala bar maalmaha | Ku dhawaad maalin kasta |
|---|---|---|---|---|
| Dareemidda walwal, walaac, ama walbahaar | 0 | 1 | 2 | 3 |
| Aan awoodin inuu joojiyo ama xakameeyo welwelka | 0 | 1 | 2 | 3 |
| Xiiso ama ku raaxeysi yar marka wax la sameynayo | 0 | 1 | 2 | 3 |
| Dareemidda niyad-jab, murugo ama rajo-la'aan | 0 | 1 | 2 | 3 |

(Haddii isugeynta jawaabaha aad kabixisay su'aalaha 1 & 2 ama 3 & 4 ay la'eg yihiin ama ka badan yihiin ≥3, fadlan arag dhakhtarkaaga)

Tixraaca: KAQEYBGALKA BAARITAANKA JIRKA (Daabacaadda Shanaad): AAFP, AAP, AMSSM, AOSSM, AOASM, AAP, 2019.

*Dib u eegis lagu sameeyey 2/10/2023*